
# Waxaa la joogaa wakhtigeynu **helilahayn Guriyeyn Dadweyne** oo Caafimaad Leh




PUBLIC HOUSING
TO WEATHER THE STORM

GOT GREEN
ROOTED IN POWER



Tani waa sheekada deegaankeena ee Koonfurta Seattle (South Seattle),

iyo waxa aynu kala kulanay ku noolaanshaha guryaha dadweynaha.

Waxaan ku noolnahay bulsho qurux badan, oo ay ka buuxaan saaxiibo iyo deris is-daryeela.



Hasa ahaatee, waxaa jira caqabado badan.

Guryaheena waxay u baahan yihiin dayactiryo joogto ah. Waa mas'uuliyadda sharciyeed ee milkiilaha inuu sameeyo dayactirkeena. Mulkiilaheena waa Maamulka Guriyeynta ee Seattle (Seattle Housing Authority (SHA)).





Natiijada, waxaan ku noolnahay xaalad aan raaxo lahayn, caafimaad lahayn, iyo xaalado aan ammaan ahayn sida daadinta (biyo siidaynta), caaryada, qalabyada oo jaban, iyo in ka badan. Tani waxay socon kartaa bilo ama xitaa sanado.

## Waxaas oo dhan waa wax aan la aqbali karin.

Waxa kale, isbeddelka cimilada waxay keentay xagaaga oo aad u kulul oo qiiqaya, taas oo adkeynaysa in lagu jiro is-qaboojin iyo in la neefsado. Waa inaan ku tiirsanaano marwaxyada, filtarrada hawada, iyo xarumaha qaboojinta bulshada.





Iyadoo ay jirta isbedelka cimilada, waxa kale ee jira waa kor u kaca duufaanada iyo qabow sii badan oo horseedaya tubooyinka oo barafoobay, daad daran, iyo masiibooyin taas oo sii xumaynayso dayactir la'aanta guryaheenna.

Bulshadeena waa la qiimeeyay oo laga saaray magaalada, iyadoo ganacsatada hantida maguurtada ah ay korinayaan awooddooda iyo faa’iidadooda. Halkii laga siin lahaa guryo sii badan oo si joogto u ah guryo dadweyne oo si joogto u ah wax la awoodi karo, waa la dumiyaa guryaha dadweynaha, dhulka dadweynaha waxaa laga iibiyaa shirkado horumariyayaasha, waxaana laga dhisaa guriyeen qaali ah beddelkeeda.




# Sidaa darteen maxaan ka yeelnaa arrintan?



Waanu is-abaabuleenaa oo waanu dagaalameynaa. Waxaan u dagaalameynaa xaqa ay bulshadeena u leedahay in ay ku noolaadaan guriyeen dadweyne oo caafimaad leh, iyadoo dayactirada lagu sameeyo si degdeg ah iyo iyada oo noola dhaqmo si daryeelid leh iyo ixtiraam leh.

Waxaan garaaceynaa albaabada deriskeena, annagoo u sharxeyna arrimaha aan la kulmayno. Deriskeena waxaa gashay dhiirigelin oo way nagu soo biirayaan sababtoo ah waxay og yihiin marka aan isu nimaadno, waxaan awood u lahaaneynaa inaan bedelno xaaladeena.



Waxaan qaban-qaabineynaa shirar, anaga aan hogaamineyno oo anaga aan leenahay, si aan u qorshayno sidii aan cadaadis u saari lahayn mulkiilaheena si uu u dhamaystiro dayactirka wakhtigiisa la dhaafay iyo uu u bedelo nidaamka dayactirka.



Marka aan isu nimaadno, waan isku xiranahay, tamar baan yeelaneynaa, oo waxaan diyaar u nahay in aan u dagaalano guriyeen dadweyne ee caafimaad leh!




Waxaan qaadaneynaa tallaabo si aan u tusno mulkiilaheena, SHA, sida aan u leenahay awood marka aan midowno, sida ay lagama maarmaan u tahay in aan ku noolaano guriyeen caafimaad leh, iyo sida aanan dib uga laaban doonin illaa aan ku guuleysanno dayactirka aan u baahanahay. Waanu isu imaaneynaa oo waan u dagaalamaynaa dayactirada anagoo la socono qoysaskeena, asxaabteena, deriskeena, iyo bulshadeena.

Shaqadeena adag ee isu imaatinka iyo u dagaalanka waxa aan istaahilno darteed, waxaan si wax ku ool ah u cadaadinay SHA si ay u dhamaystiraan dayactirka iyo hagaajinta nidaamka codsiga shaqada si uu u noqdo mid jawaaba, waxtar leh, oo uu sahlan yahay isticmaalkiisa.



Marka aan guulaysano ka dib, dayactirka guriyeenta dadweynaha waxay u fiicnaan doontaa kiraystayaasha, shaqaalaha, iyo bulshada.





Guryaheena waxay ahaan doonaan kuwo caafimaad leh. Hawada waxay ahaan doontaa mid nadiif ah, darbiyadana kuwa daboolan, iyo qalabyada oo si fiican u shaqeynaya.

Waxaan u dabaaldegi doonaa guulaheenna oo waxaan u adeegsan doonaa warqadan si aan u sii wadno u dagaalanka nidaam daryeelaya bulshadeena iyo meeraheena.





Mustaqbalka, guriyeenta dadweynaha waxay noqon doonaan wax loogu talagalay dadka iyo meeraha, ma ahaanayo wax loogu talagalay dayacaad qoto dheer iyo faa’iidada ganacsatada hantida maguurtada ah.



Guriyeenteena dadweynaha waa inay xakameeyaan duufaannada soo socda. Ku guuleysiga dayactiradaa waa tillaabada ugu horreysa ee ka dhigista guryaheenna, bulshadeena, iyo meeraheena kuwo sii caafimaad leh. Waxna isma beddelayo illaa aan isu nimaadno oo aan u dagaalano.

# Ma nagu soo biiri doontaa?

**GOTGREENSEATTLE.ORG**
PO BOX 18794 SEATTLE, WA 98118

Illustrations by Ana Von Huben